

XARUNTA DARYEELKU WAXAY U FURAN TAHAY DADKA OO DHAN

Peder Lykke Centret

- xarunta daryeelka dadyawga kala duwan



Dobrodošli

Velkommen

欢迎

Welcome

خوش آمدید

Hoşgeldiniz

Soo dhawaw

ترحيب

آپ کا خیر مقدم ہے

PEDER LYKKE CENTRET

Velkommen



آپ کا خیر مقدم ہے



SIDA GURIGAAGA MA U DAREEMI KARTAA XARUN DARYEEL OO DENMARK KU TAALA?



Xarunta Peder Lykke

- xarun daryeel ee dadyawga kala duwan

Ku soo dhawaada xarunta Peder Lykke Centret – xarunta daryeelka dadyowga kala duwan ee ugu horaysay Kobanheegan.

Xarun daryeel ee dadyawga kala duwan waxa wada degan dad ku kala duwan asal, af iyo diin. Waxa halkaas wada degan dheenish iyo dadka jinsiyadaha kale ee laga tirada roon yahay. Derisyadaada kuugu dhawi waxay ku hadli karaan afaf kala duwan oo waxay yeelan karaan diimo kala duwan.

QOF WALIBA WAA GAAR

Xarunta Peder Lykke Centret wax aanu qaderinaa habka, aad jeceshahay in aad u noolaato. Waxa muhiim noo ah, in aad sida kuu caadiga ah ee ugu suurtoogalka ah u sii wadan kartid noloshaada – waxa la mid ah arimaha diinta iyo danaha. Waxa aanu caado u leenahay in aanu la shaqayno dad ka soo kala jeeda jinsiyado kala duwan. Oo waxa haddaba jira dad ka soo jeeda jinsiyadaha laga tirada roon yahay, oo adeegsada deeqdayada xarunta hawlqabashada iyo dugsimaalmeedka (aktivitetscentret og daghøjskolen).

SUAALO IYO JAWAABO



MA DEGAN YIHIIN PEDER LYKKE CENTRET DAD BADAN OO KA SOO JEEDA JINSIYADAHHA LAGA TIRADA ROON YAHAY?

Maya ilaa hadda, hase ahaatee qaar badan baa adeegsada xaruntayada hawlqabashada iyo dugsimaalmeedka (aktivitetscentret og daghøjskolen). Waxa aanu rajaynaynaa, in aad nagu raacdo si aynu xarunta Peder Lykke Centret uga dhigno meel ay dar badan oo ka soo jeeda jinsiyadaha laga tirada roon yahay jeclaystaan in ay degaan. Dadka hadda degan xaruntu waxay ku faraxsan yihiin in ay helaan derisyo cusub oo wata sooyaalnololeed kala duwan.



CUNTO NOOCEEYA AYAAN HELI KARAA?

Waxa aanu xoogga saarnaa, in ay dhamaan la cuni karo cuntada, aanu samayno. Waxa aad fariin diyaar ah ku heli kartaa, alaabta qaydhin ee aanu adeegsano, iyo sida aanu cuntada ugu diyaarino madbakhkha. Shaqaalahayaga madbakhkhu waxay waxbarasho u leeyihiin sida ay maareeyaan baahiyaha kala duwan.



MA CIBAADAYSAN KARAA?

Haa. Xarunta Peder Lykke Centret waa lagu soo dhawaynayaa dhamaan dadka. Dhamaan waxay dadku fursad u haystaan in ay ku gutaan diimahooda aqaladooda gaarka ah ama qol aanu u sharaxnay ujeedadaas.



MA CIIDI KARAA XILYADA KALE EE AAN DHEENISHKU LAHAYN?

Waxa aanu doonaynaa in aanu ciidno dhamaan ciidaha ay doonayaan dadka degan xaruntu – waa ciidaha aanu hadda dhaqanka u leenahay in aanu ciidno, iyo kuwa kale ee ay wataan dadka cusubi.



SIDEE BAAN U DEGANAANAYAA XARUNTA DARYEELKA?

Waxa aad leedahay aqalkaaga gaarka ah, oo aad adigu sharaxan kartid, oo aad la iman kartid qalabka guriga la dhigo. Waxa aad leedahay oo kuu gaar ah musqusha. Waxa guriga daryeelka jooga hadh iyo habeenba shaqaale soo bartay daryeelka iyo xanaanada aad u baahan tahay. Waxa kale oo jira goobo la wada leeyahay, oo aad adeegsan karto. Qoyskaaga iyo saaxibadaaba si wayn baa loogu soo dhawaynayaa xarunta Peder Lykke Centret.



SIDEE BAY ULA SHAQEYYAAN SHAQAALUHU DADYOWGA KALA DUWAN?

Shaqaalaha xarunta Peder Lykke Centret waa dad soo bartay hawshan, oo waxay leeyihiin aqoon ku saabsan dadka degan xarunta ee asal ahaan kala duwan. Waxa aanu xoogga saarnaa in aanu dhegaysano adiga iyo qoyskaagaba. Qayb kasta waxa jooga laba-sadex shaqaale ah oo ka soo jeeda jinsiyadaha laga tirada roon yahay.





DARYEELKA MA KA HELI KARAA SHAQAALE KU HADLA AFKA AAN KU HADLO?

Waxa aad caawimo ka heli doontaa shaqaalaha, oo farsamoyaqano ku ah, in ay sida ugu wacan kaaga caawiyaan xanaanada iyo taageerada aad u baahan tahay. Mar kasta suurtagal maaha in aad taageerada ka hesho shaqaale ku hadla luuqaddaada, hase yeeshee waxaynu hawl gelin doonaa shaqaalaha kale, hadii ay suurtagal noqoto.



WAA IMISA QIIMAHA LAGU DEGANAANAYO GURIGA DARYEELKA DADYAWGA KALA DUWANI?

Waa in aad iska bixisaa kharashkaaga, sida uu yahay aqal kasta oo gaari. Kharashku wuxuu ku saabsan yahay tusaale ahaan deebaa-jiga, kirada aqalka, laydhka, kulaylka, liisanka-tv'ga, kharashka tilifoonka iyo cuntada.




HALKEE BAAN KA HELI KARAA WARAR DHEERAAD AH?

Hadii aad qabto suaalo dheeraad ah, ku soo dhawaw in aad nagala soo xidhiidhdho tilifoonka tooska ah 32 34 43 87. waxa kale oo aad ku soo dhawaataa in aad nagu soo booqato xarunta Peder Lykke Centret, oo aad aragto waxa aanu kuu hayno.




MAXAAN SAMEEYAA, HADII AAN DOONAYO IN AAN DEGO XARUNTA PEDER LYKKE CENTRET?

Waa in aad tilifoonka 33 66 33 66 kala soo xidhiidhdhaa hubinta oo kala balantaa xili aad la kulanto hubiye, kaas oo qiimaynaya, in aad heli karto aqal daryeel. Qiimayntu waxay ku dhisan tahay xeerka dowladda hoose iyo heerka adeegga, oo ay dejiyaan siyaasiyiintu. Waxa jira xeerar gaar u ah dadka shisheeyaha ah ama dhalasho dheenish haystayaasha, ku xidhan inta uu qofku degan yahay Denmark.




” Aad baan ugu faraxsanahay, in aanu dad badan oo kala duwan ku degaanaano xarunta Peder Lykke Centret, oo aanu wada degaanaano, hadana uu qof waliba habkiisa gaar ah ku socdo. ”

*Maria Magdalene Nielsen,
74-jir ah oo ka soo jeedda
dalka Filibiins*



Xarunta Peder Lykke Centret waxay ka kooban tahay guri daryeel ee dadyaw kala duwan, xarun hawlqabasho iyo dugsimaalmeed.



Xarunta Peder Lykke Centret waxay wadashaqayn soke la leedahay UrbanPlanen, xidhiidhobulsheedyada kala iyo ururada isdira (frivillige organisationer)



See you soon!



PEDER LYKKE CENTRET (XARUNTA PEDER LYKKE)

Peder Lykkes Vej 63-65

2300 København S

Tilifoon: 32 34 43 87

www.pederlykkecentret.dk

Maamulaha xarunta: Mette Olsen

Tafatirka: Center for Omsorg/Ledelsessekretariatet
(Xarunta daryeelka/Madaxa xoghaynta) Sebtabar 2013

KØBENHAVNS KOMMUNE (DEGMADA KOBANHEEGAN)

Sundheds- og Omsorgsforvaltningen (Waaxda caafimaadka iyo daryeelka ee)
kk.dk